

# KU SOO DHAWOW TAKWIILA, HOYGAAGA CUSUB

Ulajeedada tilmaan-bixiyahani waxa weeye in idinka la idin caawiyo, waa dadkiina dhawaan soo dagay. Waxannu doonaynaa inanu kaa gargaarno sidii ad ugu raaxaysan lahayd nolosha beeshayada waxa kale oo aanu doonaynaa inanu ku siino war muhiim ah oo ku saabsan Takwiila.

Waxad heli doontaa war iyo lambaro tilifoono ku saabsan arrimaha degdega ah, adeegyada bulshada, boliiska, dabka, dugsiyada, shaqada, bangiyada, sida tilifoon loo soo daysto, iyo sida baska loo raaco. Haddii ad imminka uun bilawday barashada Ingiriisiga, waxa muraadkaagu kuu fududayn karaa turjubaan haddii ad heli kartid. Waxa muhiim ah inad sidatid waraaqo aqoonsi ah iyo inad baratid cinwaanka ama adreska gurigaaga iyo lambarkaaga tilifoonka.

Waxad arki doontaa in Takwiila ay tahay meel nabad ah iyo meel ku noolashadeeda la xiiseeyo. Degmadayada waxa si fudud looga tagi karaa badhtanka Siyeetal, eeriboodhka Siitaag (SeaTac airport), iyo suuqa dukaanada ee Sawsenter (Southcenter shopping mall). Waxa kale oo ay degmadayadu leedahay laybareeriyo, beero qurux badan, iyo meelo kaladuwan oo loogu talagalay ciyaaraha. Xarunta Beesha Takwiila waxay ku taalaa 12424-42nd Avenue South, waxana laga helaa dhawr nooc oo madadaalo ah. Waxannu ku dadaalnaa inanu dhisno beel isku-duuban oo qadarisa qoysaska iyo caruurta. Waa noo nasiib wacan haddii ad dooratay inad nala noolaatid. Waxannu kugu soo dhaweynaynaa hoygaaga cusub.

*Tilmaan-bixiyahan waxa soo qabanqaabiyay Guddiga Sinaanta iyo Kala-duwanaanta Magaalada Takwiila. Magaalada Takwiila.*

*Guddida Sinaanta iyo Kala-duwanaantu waxay hormarisaa is-ogalaasho iyo ixtiraam ka dhex-dhasha jinsiyadaha iyo dhaqamada laga helo beesha Takwiila. Xubnaha Guddidu waxay kulmaan Khamiista ugu horeysa ee bil walba 5:15 galabnimo, waxayna ku kulmaan , Tukwila City Hall. Wixii war dheeraad ah, kala xidhiidh 206-433-1834. Fadlan kaalay oo nagu soo biir.*

*Warka ku qoran Tilmaan-bixiyahan Adeegyada Beesha waa la badali karaa ogeysiis la'aan. Wixii war cusub ah kala xidhiidh adeeg-bixiyayaasha gaarka ah. Magaalada Takwiila iyo taageeraayaasheeda beesha ka mid ah eed ugama iman karto warka halkan ku qoran ama isticmaalkiisa. 01/31/01*

*Waxaad soo dhaawlood gareeynsan kartaa luqadaada doontid iyo ka sameeysa kartaa koobiyada aad doonayso.*

## LAMBARADA DEGDEGA AH

**BOLIIS, DAB, CAAFIMAAD .....9-1-1**

### BUDHCADNIMADA GURIGA

Budhcadnimada guriga dhexdiisu waa dambi Magaalada Takwiila iyo Gobolka Wooshinton. Budhcadnimada guriga waxa lagu tilmaami karaa dhaqan-xumo habaysan – oo ah jidh, galmo ama maskax – oo lagu isticmaalo guriga laba isqabta iyo xidhiidhka kale ee is-dhexgal leh si loo samaysto ama joogteeyo xukumista qofka kale. Budhcadnimada guriga dhexdiisa waxa ku jira dhaawac jidhka loo geysto, cabsi-galin qofka lagu cabsiiyo dhawaac dhaqsa ah in loo geysan karo, iyo galmo xoog ah.

Askarta boliiska ah ee loogu yeedho budhcadnimo guriga ah waxay sharci u leeyihiin inay baadhitaan sameeyaan iyo inay qofka qabtaan marka go'aan laga gaadho in farosaar dhacay. Haddii lagugula kacay budhcadnimo guriga dhexdiisa, kala xidhiidh Ciidanka Boliiska lambarka (9-1-1) sheegna dhibaataada. Wixii ah adeegyada aan degdega ahayn, eeg warka ku hoos qoran Xafiiska Adeegyada Bulshada (Office of Human Services).

### CISBITAALKA UGU DHOW EE LEH ADEEG

**GARGAAR DEGDEG AH 24-KA SAACADOOD.....206-244-9970**

Cisbitaalka ‘ Xarunta Caafimaadka Highline  
16251 Sylvester Rd. S.W., Burien

### DARYEELKA DHAKHTARKA EE AAN

**DEGDEG AHAYN.....206-575-3136**

Xarunta Caafimaad ‘Health South Medical Clinic – 17780 Southcenter Parkway, Tukwila  
Saacadaha: Isniin ilaa Jimce, 7–11; Sabti & Axad, 9–5

Xarunta Caafimaadka New Hope - 15880 Military Road S., Tukwila,.....206-453-1868

[www.newhopehc.org](http://www.newhopehc.org)

Saacadaha: Sabtida, 8:30 am ilaa 12:00 duhurnimo (dabaqa hoose raac Fellowship Bible Church)

HealthPoint Medical Clinic – 4040 S. 188<sup>th</sup> St, # 201, SeaTac.....206-277-7202

HealthPoint Dental Clinic – 403 E. Meeker St., Flr 1, Kent.....253-796-4071

**XARUNTA QALALAASAHA (24 saacadood) .....206-461-3222**

**KHADKA WARKA EE BEESHA**

(Wixii aan degdega ahayn) .....2-1-1 ama 206-461-3200

**IMIGARAYSHANKA MARAYKANKA (IMMIGRATION**

**AND NATURALIZATION SERVICE) .....1-800-375-5283** <http://www.ins.usdoj.gov>

**XAFIISKA DAWLADA HOOSE EE**

**MAGAALADA TAKWIILA.....206-433-1800**

6200 Southcenter Boulevard, Tukwila  
Saacadaha: Isniin ilaa Jimce, 8:30 subaxnimo ilaa 5:00 galabnimo

Booqo rugtayada internetka: <http://www.tukwilawa.gov>

**XAFIISKA ADEEGYADA BULSHADA (OFFICE OF HUMAN SERVICES)**

**206-433-7180 / 7181**

Xafiiska Adeegyada Bulshada (Office of Human Services) waxa uu la xidhiidhiyaa daganayaasha magaalada Takwiila adeegyada iyo barnaamijyada haqab-tiri kara baahidooda. Magaaladu si toos ah uma bixiso wax gargaar dhaqaale ah, laakiin waxay wax siisaa dhawr hay'adood oo samofal ah si ay adeegyadooda uga dhigaan kuwo ay ka faa'iidayaan karaan daganayaasha magaaladayadu. Adeegyada ay Magaaladu taageerto waxa ka mid ah:

- Warka cuntada iyo guryaha degdega ah
- Adeeyo loogu talagalay waayeeelka iyo dadka naafo leh
- Adeeyo loogu talagalay dhalinta iyo qoysaska
- Barnaamijyo la-talin ah
- Gudbinta Budhcadnimada Guriga
- War, gudbin iyo u-doodid
- Waxbarashada Ingiriisiga iyo barashada farta ama qorista
- Gargaarka Shidaalka (laydhka/korontada, kulaylka, iwm.)
- Hagaajinta Guriga

Waxannu ku naala: 6300 Southcenter Boulverd (ku xiga Xafiiska Dawlada Hoose), . Haddii aad doonaysid inad soo booqatid xafiiskayaga, fadlan marka hore na soo wac si ad habsatid inanu joogno xafiiska. Waxyaabahan soo socda waa adeegyada anu soo hadal qaadi doono; kuligood kuma wada yaalaan Takwiila.

**CUNTO**

Goobaha Deeqda Cuntada bixiya iyo meelaha kale ee gargaar cunto waxay furan yihiin wakhtiyo kala-duwan. Waxa fiican in marka hore la waco meelaha si loo ogaado saacadaha ay shaqeeyaan, meelaha ay ku yaalaan, iyo wixii kale ee shuruud ah. Adeegyadan cuntada ayaa imminka u adeega dadweynaha degan Takwiila:

- Tukwila Pantry .....206-431-8293
- Deeqda Cuntada 'Emergency Feeding Program' .....206- 329-300
- Kaniisada Dhinaca jidka (Qado bilaasha ah talaadada 12) .....206-243-5024
- Kaniisada Katooliga 'St. Thomas Catholic Church' .....206-242-5501

**DHARKA**

- Kaniisada Fellowship Bible.....206-242-7767
- Kaniisada 'St. Thomas Catholic Church' .....206-242-5501
- Kaniisada 'Midway Community Covenant Church'.....206-878-4861
- Xarunta 'Multi-Service Center' .....253-838-6810

**ILLAHA QAXOOTIGA IYO SOO GALAYAASHA**

- Isku taga Haweenka Qaxootiga – Xafiiska SeaTac..... 206-957-2029
- Ururka Howlaha Bulshada Somalida..... 206-431-7967
- Literacy Source English Classes ..... 206-782-2050
- Lutheran Communit Services.....206-901-1685

**GARGAARKA CUNTADA (FOOD STAMPS) IYO GARGAARKA**

**DHAQAAL/GARGAARKA KU-MEEL-GAADHKA AH EE**

**QOYSASKA BAAHAN**

**Qaybta Adeegyada Bulshada iyo Caafimaadka**

**(Department of Social and Health Services – DSHS) 1-877-501-2233**

Rugta Internetka: <http://www.dshs.wa.gov>

Gargaarka Cuntada (Food stamps) ayaa la siin karaa qoysaska dhaqaalahoodu hooseeyo. Gargaarka lacagta cadaaanka ah (kaash) iyo gargaarka caafimaadka ayaa la siin karaa qoysaska dhaqaalahoodu hooseeyo ee leh caruur cimrigoodu ka yar yahay 18 sannadood.

## **ADEEGYADA AAN DEGDEGA AHAYN DHIBANAYAASHA BUDHCADNIMADA GURIGA IYO GALMADA**

### ***Barnaamijyada Khaaska ah***

Xarunta Farosaarka Galmada ‘King County Sexual Assault Resource Center’ .....	1-888-998-6423
YWCA.....	206-568-7849
Xarunta Farosaarka Galmada/Cisbitaalka Harborview	
‘Sexual Assault Center/Harborview Medical Center’ .....	206-744-1600
Isbahaysiga Dumarka Qaxootiga ah ‘Refugee	
Women’s Alliance’ .....	206-721-0243
Xarunta ‘El Centro de La Raza’ .....	206-957-4634
Dumarka La-xumeeyay ‘Domestic Abuse	
Women’s Network (DAWN)’ .....	425-656-STOP
Dumarka La-xumeeyay ee Dhago-l’a ‘Abused	
Deaf Women’s Advocacy Services’ (TTY) .....	206-726-0093
Xarunta Dumarka Aasiya Jasiiradaha Baasiifiga ‘Asian	
and Pacific Islander Womens Family Safety Center’ .....	206-695-7600

### ***Gargaarka Sharciga ee Dhibanayaasha***

Adeegyada Sharciga Columbiya/Barnaamijka	
Dumarka la-xumeeyay ‘Columbia Legal	
Services/Abused Women’s Project’ .....	206-464-5911
Barnaamijka Xuquuqda Soo-guuraaga	
‘Northwest Immigrant Rights Project’ .....	206-587-4009
Barnaamijka Caafimaadka Hindida	
Maraykanka ee Siyeetal	
‘Seattle Indian Health Board’ .....	206-324-9360 X2807/2806
‘Network of Bi, Trans, Lesbian and Gay Survivors of Abuse.....	206-568-7777

# CIIDANKA BOLIISKA

**Degdeg: 9-1-1**

Ciidanka Boliiska Takwiila waxa uu siiyaa adeegyada amaanka dhamaan dadweynaha Takwiila. Xafiiska ciidanku waa u furan yahay 24 saacadood, waxana u ku yaalaa Xafiiska Dawlada Hoose ee Takwiila (Tukwila City Hall), '6200 Southcenter Boulevard.' Waad soo wici kartaa ama iman kartaa xafiiskayaga. Haddii askari ad u baahan tahay marka u jiro wax degdeg ahi, tilifoon kasta ka garaac 9-1-1 weydiisana gargaar. Diyaar u noqo inaad sheegtid meesha iyo tilifoonka ad ka soo hadlaysid. Marka xaaladu aanay degdega ahayn, waad garaaci kartaa 9-1-1 ka dibna ad sheegi kartaa muraadkaaga.

## **AMAANKA BEESHA**

Amaanka beesha waa fikrad annu rumaysan nahay hadaanu nahay ciidanka boliiska. Waxa annu aaminsan nahay in beesha iyo Ciidanka Boliisku ay wada-shaqeyaan si loo helo beel amaankeedu sii hagaago.

## **KA-HORTAGGA DAMBIGA**

Ciidanka boliisku waxa u leeyahay qayb bixin karta warka ku saabsan amaanka qofka, barnaamijka wada-ilaalinta xaafada, iyo adeegyada beesha.  
**Kooxda Illaha Ka hortaga Denbiyada..... 206-431-2197**

[www.ci.tukwila.wa.us/police/pdcrimemp.html](http://www.ci.tukwila.wa.us/police/pdcrimemp.html)

## **BUDHCADNIMADA GURIGA**

Budhcadnimada guriga dhexdiisu waa dambi Magaalada Takwiila iyo Gobolka Wooshinton. Askarta boliiska ee loogu yeedho budhcadnimo guriga ah waxay sharci u leeyihiin inay baadhitaan sameeyaan iyo inay qofka qabtaan marka go'aan laga gaadho in faroosar dhacay. Haddii lagugula kacay budhcadnimo guriga dhexdiisa, la xidhiidh Ciidanka Boliiska una sheegna dhibaataada. Wixii ah adeegyada aan degdega ahayn, eeg warka ku hoos qoran Xafiiska Adeegyada Bulshada (Office of Human Services).

## **WADISTA BAABUUR ADIGOO MAANDORSOOMAY**

Wadista baabuur adigoo sakhraansan ama u ku maandooriyay isticmaalka daroogo ama/iyo khamri (DUI) waa dambi Magaalada Takwiila iyo Gobolka Wooshinton. Haddii ad khamri cabtay ama ad qaadatay daroogo, ha kaxayn wax baabuur ah. Haddii lagugu qabto wadis baabuur adoo sakhraansan ama maandoorsomay (DUI), waxa lagugu xukumi karaa xadhig iyo ganaax lacag badan.

## **HOWLAHA BADBAADINTA CARUURTA**

Soo wac 1-866-ENDHARM (1-866-363-4276\*) haddii aad u maleeyso inuu jiro: waxyelitaan ama dayacaad caruurta loo geestay (dhaawac, galmo, ka faa'iideeysi u tagitaan ama si xun ula dhaqan) qof kasta oo u geysta taasoo muujinaysa in cunugaas caafimaadkiisa, wanaagiisa iyo nabadgelyadiisa wax la yeelay.

## **HOWLAHA BADBAADINTA QAANGAARKA**

Soo wac 1-866-221-4909 haddii aad u maleeynayso in waxyeelid ama dayacaad loo geestay qof qaangaar ah oo dhibana. APS waxay badbaadisaa dadka qaangaarka ah ee aan awooda lahayn iyadoo soo baarta eedaha wax gaarsiinta, dayacaada, ka tagida iyo ka faa'iideeysiga dhaqaale marka qofku ku nool yahay gurigisa. APS waxay qabataa baaritaan bilaash ah iyadoon loo eegayn daqliga soo gala dhibanaha. Qaar a mid ah howlaha badbaadintu waxaa laga yaaba in lagu qabto qarash..

**Soo wac 9-1-1 haddii ay caruur ama qof qaan gaar ahi ku jiro xaalad qatar ah**

**QAYBTA DAB-DAMISKA**  
**Degdega: 9-1-1 hayn Degdeg: 206-575-4404**

**RUGAHA DAB-DAMISKA**

Qaybta Dab-damiska Takwiila waxay leedahay afar rugood oo dabdamis ah:

**Rugta 51:** waxay ku taalaa '444 Andover Park East' waana xarunta maamulka. Dhamaan hawlaha ka-hortagga dabka, dib-u-eegista qorshaha, iyo ogalaashaha waxa lagu qabtaa rugtan.

**Rugta 52** ku taala '5900 South 147th Street'

**Rugta 53** ku taala '4202 South 115th Street'

**Rugta 54** ku taala '4237 South 144th Street'

**GARGAARKA DEGDEGA AH**

Si ad u soo sheegtid dab ama arrin kale oo degdeg ah, soo wac 9-1-1 adoo tilifoonkaaga isticmaalaya. Ha tagin rugta dab-damiska, waxa dhici karta in shaqalahu ku maqan yihiin arrin degdeg ah oo kale rugtana aanay cidii joogin.

**CABIRIDA CADAADISKA DHIIGA/DHIIG KARKA**

Marka ay shaqaalaha dab-damisku joogaan mid ka mid xarumahooda, si farxad leh ayay kuugu samayn karaan cabirista cadaadiska dhiigaaga ama dhiig karka. Qof ayaa marwalba jooga rugta 51 siadeegaa loo qabto.

**QIIQ-SHEEGEYAL**

Haddii ad ku nooshahay guri kiro ah, waa in kireeyuhu u dhigaa ugu yaraan hal xabo oo ah qalabka qiiq-sheegaha ah guriga ama abaarmanka. Hase yeeshe, adigaa ka masuul ah hubinta in qalabka qiiq-sheeguhu si wacan u shaqaynayo. Xusuuso inad ka badashid baytariga sannadkii mar, taasoo badanaa la sameeyo xilliyada saacada la kordhiyo ama dib loo dhigo (gu'gii iyo dayrtii).

# DUGSIYADA DEGMADA TAKWIILA

206-901-8000

Rugta Internetka: <http://www.tukwila.wednet.edu>

Gobolka Wooshinton waxa u leeyahay sharci qasbaya in tagista dugsiyadu tahay qasab. Waalidka iyo dadka masuulka caruurta ka ah waxa laga doonayaa inay hubsadaan in caruurta tagto dugsiyada. Dugsiyada dadweynaha ee magaalada Takwiila waxay u adeegaan caruurta fasalada K-12 (. Waxbarashada Qaaska ee ardayda curyaamiinta iyo barnaamijka ECEAP waa u diyaar . Kala xariir xafiiska degmada ama iskuulka wixii warbixin .

Dugsiyada Degmada Takwiila waxay ka kooban yihiin saddex dugsi hoose, hal dugsi dhexe, iyo hal dugsi sare ah. Waxana ay yihiin:

**Dugsi hoose 'Cascade View Elementary School'..... 206-901-7700**

13601 - 32nd Avenue South

**Dugsi hoose 'Thorndyke Elementary School' ..... 206-901-7600**

4415 South 150th Street

**Dugsi hoose 'Tukwila Elementary School'..... 206-901-7500**

5939 South 149th Street

**Dugsi dhexe 'Showalter Middle School' ..... 206-901-7800**

4628 South 144th Street

**Dugsi Sare 'Foster High School' ..... 206-901-7900**

4242 South 144th Street

**McKinney Vento Liaison..... 206-901-8044**

## SAACADAHA TAGISTA DUGSIYADA

Fasalada Hoose K1 ilaa 5	9:00 subaxnimo	3:10 galabnimo
Fasalada Dhexe 6 ilaa 8	8:00 subaxnimo	2:30 galabnimo
Fasalada Sare 9 ilaa 12	8:00 subaxnimo	2:30 galabnimo

## DUGSIYADU WAY SOO DHAWEEYAAN WAALIDKA

Waalidka waxa lagu soo dhaweynayaa inay soo booqdaan dugsiyada degmada Takwiila maalintii, iyo waliba fiidkii markay jiraan hawlo. Booqashada maalintii waxa loo baahan yahay in la sii balansado maalinta iyo saacada. Fadlan wac dugsiyada si diyaar laguugu noqdo. Mida kale, waxa lagaa doonayaa inaad sii martid xafiiska dugsiyada intaanad tagin fasalka ardaydu fadhido.

## WARBIXINTA HORUMARKA ARDAYDA

Si joogto ah ayay macalimiinta dugsiyada Takwiila ugu soo diraan waalidka warbixin qoran iyo mid afka ah oo ku saabsan horumarka waxbarashada ilmahooda. Warbixintaa waxa ku jira warka aasaasiga ah ee waalidka ka gargaari kara sidii ay u fahmi lahaayeen horumarka waxbarasho iyo shakhsiyadeed ee ilmaha. Waalidka leh arday dhigata dugsiyada dhexe ama sare waxay helaan sannadkii afar warbixin. Waalidka ardayda dugsiyada hoose helaan 3 warbixinood sanadkii. Shirka Waalidiinta iyo macalimiinta waxaa la qabtaa deyr iyo gu kasta.

## ADEEGYADA CAAFIMAADKA ARDAYDA

Kalkaaliso sharci leh ayaa ka baadha ardayda dhibaatooyinka aragga, ilkaha iyo maqalka, kooxaha caafimaadku waxay ka caawiyaan howlaha u diritaanka caafimaadka. .

## BARNAAMIJKA QURAAACDA/QADADA EE DUGSIGA

Ardaydu waxay ka iibsanaa karaan dhamaan dugsiyada dadweynaha ee Takwiila cuntooyin miisaaman oo nafaqo leh quraacda iyo qadada. Waxa la helaa cunto bilaash ah ama qiime jaban ah oo loogu talagalay ardayda qoysaska dhaqaalahoodu hooseeyo. Waalidku waxay ka heli karaan warqada codsi cunto bilaash ah ama qiime jaban ah mid kasta oo ka mid ah xafiisyada dugsiyada.

## ADEEGYADA SII-HAYNTA ILMAHA

206-329-5544

Noocyo badan oo sii-haynta ilmaha ayaa la helaa. Dawlada Gobolka Wooshinton waxay amraysaa in goobaha siihaynta ilmaha qaarkood ay yihiin qaar leh warqad ogalaasho isla markaana ay soo kormeeraan saraakiisha dawlada. Goobaha leh ogalaasho waa inay ka soo baxaan heerka sharci ahaan laga doonayo goobaha sii-haynta. Adeegyada Siihaynta ilmuhu waxay kaa gargaar karaan helista meel sii-hayn ilmo haysata ogalaasho ama liisan oo ku taala Degmada Kiin (King County). Marka la eego dhaqaalahaaga, waxa dhici karta in kharash lagu weydiyo marka lagaa gargaarayo doorashada goob sii-hayn ilmo.

## WARKA BANGIGA IYO DHAQAALAHA

Bangiyadu waxay bixiyaan noocyo kala-duwan oo adeegyo ah. Adeegyadaa waxa ugu horeeya xisaabaha jeega iyo dhigashada. Adeegyada kale waxa ka mid noqon kara daynta, taasoo loo isticmaali karo in baabuur ama guri lagu iibsado, waxa kale oo ka mid ah Xisaabaha Hawlgabnimada ee Gaarka ah, kuwaasoo loo isticmaalo inay kaa gargaaraan sidii ad lacag ugu dhigan lahayd markad gabowdo. Weydii bangigaaga noocyada adeegyada u bixiyo iyo wixii kharash ka yimaada.

### SIDA LOO FURTO XISAAB BANGI OO JEEG 'CHECKING' AMA DHIGASHO AH 'SAVINGS'

Bangiyadu guud ahaan waxay ku siin karaan xisaabaha caadiga ah, sida ta jeega iyo ta dhigashada. Laakiin, xagga habka iyo kharashka – xisaabuhu way kala duwanaan karaan. Weydii bangiga kharashka u saaro furista xisaab, lahaanta xisaab, bixinta jeegag, iyo wixii kale ee kharash ah. Si ad xisaab u furatid, bangigu ku weydiin doono lambarka sugida/sooshiyalka iyo noocyada kale ee aqoonsiga. Noocyada waraaqaha aqoonsiga ee la ogol yahay waxa ka mid ah tusaale ahaan:

#### ***Kuwa Koobaad – La Jecelyahay***

1. Liisanka darawalka
2. Kaadhahka aqoonsiga dawlada bixiso
3. Kaadhahka aqoonsiga ee Ciidanka
4. Fiisooyin Maraykan ah
5. Fiisaha Daganaanshaha (green card)
6. Baasaboora

#### ***Kuwa Labaad***

1. Kaadhka Aqoonsiga
2. Kaadhka Aqoonsiga ee Dugsiga
3. Kaadhka Daynta 'Credit card'
4. Kaadhka Iibsiga 'Debit card'
5. Kaadhka cod-bixiyaha
6. Biil cusub oo laydh/koronto, ama adeeg kale

Bangiyada intooda badani waxay leeyihiin qadar ugu yar oo ay ogol yihiin inay kuugu furaan xisaab, badanaa taasi waa \$200. Marka xisaabtaada la furo waxa lagu siin war qoran oo ku saabsan xisaabtaada. Xusuuso inad waraaqaha oo dhan dhigatid meel amaan ah, sida sanduuqa dhigashada. Iyo ma wadaagaan warbixintaas.

### FAA'IIDADA AY LEEDAHAY DHIGASHADA LACAG BANGIGA

Hal sabab oo lacagta loogu rito xisaab bangi oo ah jeeg ama dhigasho waa amaanka lacagta. Kama walwali doontid in lacag cad lagaa xado ama ay kaa lunto. Waxa kale oo ay Hay'ada Cayminta Dhigaalka ee Dawlada Federalka 'Federal Deposit Insurance Corporation (FDIC)' balanqaadaysaa inay qof walba oo dhigte ah u amaangasho \$100,000 haddii bangigu kaco. Taa macnaheedu waxa weeye in dawlada Maraynkanku ay badbaadinaysa lacagtaada.

Faa'iido kale oo u isticmaalka bangigu leeyahay waa awooda ad leedahay inad qortid jeeg ad ku bixisid biilasha halkad lacag cad ama kaash wax ku bixin lahayd. Qorista jeegu waxay keenaysaa inu kuu dhigmo risiidhka lacagta ad bixisay iyo qoraal ah sida ad lacagtaada u isticmaashid. Taasi waxay kaa anfici karta la-socodka kharashkaaga iyo samaynta qorshe. Waxa kaloo jirta in xisaabaad badan u fuulo dulsaar, iyadoo bangigu u lacagtaada lacag kuugu darayo si abaalgud lagaaga siiyo isticmaalka bangiga. Qiimaha dulsaarku waa u kala-duwanaan karaa, sidaa daraadeed weydii bangigaaga.

## WARKA TILIFONKA

### SIDA LOO GASHADO TILIFON CUSUB

Haddii ad u soo guurtay guri cusub ama samaysatay ganacsi cusub, shirkada 'Qwest' ayaa kuu xidhi doonta tilifoon cusub. Shirkada 'Qwest' waxay kaloo samayn doontaa wixii shaqo kale loo baahan yahay in laga qabto tilifoonkaaga. Fadlan kala hadal 'Qwest' lambarka 1-877-501-4074 wixii ah tilifoon guri iyo 1-877-744-4416 wixii ah tilifoon ganacsi.

Sii diyaarso warkan soo socda, markad codsanaysid tilifoon cusub oo lagu soo daayo:

- Cinwaanka/adreeska gurigaaga.
- Sida ad doonaysid in magacaaga loogu qoro buuga tilifoonka.
- Nooca adeega ad doonaysid.
- Shirkada ad u dooranayso wicitaanada fogfog.
- Warka taariikhda daynta. Haddii aanad taariikh dayn ama magic ka samaysan 'Qwest' ama shirkad tilifoon oo kale, waxa dhici karta in lagu weydiyo lacag ad dhigtid ama deebaaji.

Ka hor intaanad xisaab furan ama lagu soo deyn weydii kharashka lagugu siin doono adeegyada ad dooratay, ay ku jirtana kharashka wicitaanada dhow iyo kuwa meelaha fog.

### SIDA LACAGTA/BILKA LAGUUGU SOO DALACO

Bishiiba mar ayaa biilka lagu soo diri doonaa. Si wanaagsan u hubi biilka. Eeg kharashka caadiga ah, ay ku jirto adeega aasaasiga ah, wicitaanada fogfog, adeegyada dheeraadka ah, iyo lacag hore kuugu hadhsanayd. Biilkaaga ugu horeeya waxa ku jira doona kharashka soo-galinta iyo adeega aasaasiga ah oo bil la soo hormariyay. Waxad masuul ka tahay dhamaan wicitaanada meelaha fog ee laga sameeyay tilifoon aad adigu biilkiisa masuul ka tahay. Xitaa haddii aadan adigu wicin telefoonadaad.

## BADBAADINTA ISTICMAALAH

Halkan hoose waxa ku qoran wacyaabaha inta badan dadku cabasho ka keeno iyo sida looga leexdo.

- **Wareejin qarsoodi ah ‘Slamming’** – waa iyadoo qofka shirkadiisa wicitaanada fogfog laga wareejiyo iyadoon qofku bixin ogalaasho. Tani waxay ka iman kartaa wicitaan dilaal ku soo wacay ama abaalgud boosta laguugu soo riday oo ad qaadatay. Marwalba si taxadir leh u akhri warka ku saabsan abaalgudka isla markaana si cad u sheeg waxad doonaysid markad ka jawaabaysid wicitaanada dilaalayda ee ku saabsan badalista shirkadaha wicitaanada fogfog.
- **Ku-xidhiidhin ‘Cramming’** – waa marka kharash aanad ogalaashihiisa bixin lagu soo daro biilkaaga. Kharashkaasi waxa uu noqon karaa wicitaan la wacay lambar ka bilaabma 900 ama kharash ka yimi adeega fariinta qabta kaasoo aanad codsan aanad lahaynna. Waa inad si taxadir leh u eegtaa biilkaaga bisha isla markaana ad hubisid inu sax yahay kuna qoranyihiin adeegyada ad codsatay kaliya.

## SIDA LAGU HELO LAMBAR TILIFOON AAN KU QORNAYN BUUGA TILIFOONADA

Haddii ad u baahnan tahay in lagaa gargaaro helista lambar tilifoon oo degmadaada ah ama lambar meel fog, fadlan wac 411. Badanaa adeegani kharash ayuu leeyahay.

## SIDA LOO WACO LAMBAR MEEL FOG

Isticmaal tirooyinka furaha ah markad wacaysid meelo ka baxsan degmadaada. Ka eego maababka iyo liisaska ku qoran buugaaga tilifoonka si ad u heshid lambarka furaha ah ee ad u baahan tahay. Haddii magaalada ad doonaysid aanay ku jiran kuwa furahoodu qoran yahay, la xidhiidh shirkadaada wicitaanada fogfog ‘long-distance.’

Guud ahaan, habka ugu jaban ee wicitaan meel fog waa adiga oo gurigaaga wicitaanka ka sameeya. Haddii ad isticmaalaysid tilifoon ku yaala dibada, kaadhka wicitaanada ee la iibsado ayaa ah habka ugu jaban. Si taxadir leh u raadso kaadhka wicitaanka ee la iibsado sababta oo ah qiimahoodu aad ayuu u kala-duwanaa karaa.

## SIDA LOO SAMEEYO WICITAAN WADAN KALE

Wicitaanadaa wadan kale waxay si toos ah u sii maraan shirkada wicitaanada fog ee ad dooratay.

Sidan ayaa loo sameeya wicitaan wadan kale: Si ad wicitaan toos ah u samaysid, garaac “011” + furaha wadanka + furaha magaalada + lambarka. Waxa dhici karta inay wakhti qaadato inta wicitaanku wadanka kale kuu galayo; waa inad filataa ugu yaraan inad sugtid 45 ilbidhiqsi ama sekan (ka dib markad dhamaysid garaacista) si uu tilifoonka ad wacdid u yeedho ama dhawaaqiisa u maqashid. Haddii ad u baahan tahay gargaar u ku siiyo shaqaalaha tilifoonku, garaac “01” + furaha wadanka + furaha magaalada + lambarka. Shaqaaluhu wuxu ku waydiin doonaa nooca wicitaanka ad doonaysid inad samaysid. Furayaasha wadamada aad loo waco waxa laga heli karaa buugaagta tilifoonada. Wixii war ah ee ku saabsan furayaasha wadamada iyo magaaloyinka kale, fadlan kala xidhiidh shirkadaada wicitaanada fogfog.

## WICITAANADA HANJABAAD AMA KHASIISNIMO AH

Samaynta wicitaano hanjabaad, khasiisnimo, ama xasarad ahi waa dambi jabinaya xeerarka gobolka iyo federaaliga. Haddii wicitaan hanjabaad ah ad heshid, wax war ah ha bixin, dhig tilifoonka isla markiina u sheeg boliiska. Adigoo ka wacaaya 9-1-1

Waxad kaloo gargaar ka heli kartaa Xafiiska Wicitaanada Xasarad ah ee ‘Qwest’ oo leh lambarka 1-800-582-0655.

## WARKA GAADIIDKA

### GAADIIDKA BAABUURTA

Si ay u noqdaan kuwo sharciyaysan, waa in baaburtu ay leeyihiin warqada ogalaashaha ay bixiso Dawlada Wooshinton. Wade ama darawal waliba waa inu haystaa liisan darawal sax ah, kaasoo lagu helo imtixaan. Weydii inad afkaaga ku mari kartid imtixaanka. Darawalada waxa kale oo laga doonayaa inay haystaan caymiska baabuurta.

### Xafiiska Liisanada Wadaha ee Gobolka

Renton.....1314 Union NE, Suite 4.....425-277-7230  
Kent.....25410 - 74th S.....253-872-2782

### Xafiiska Sharciyaynta Baabuurta

Burien.....628 SW 151<sup>st</sup> St.....206-243-8222  
Renton.....329 Williams Avenue S. ....425-228-5640  
White Center.....10250 - 16th SW.....206-763-7979

### GAADIIDKA BASASKA

#### BASASKA LEH JID GO’AN

Basaska jidka go’an leh waa basaska mara jid khaas ah saacado khaas ah, iyagoo joogsanaya hakadyo bas oo khaas ah. Si ad u raacdid baska, raac talaabooyinkan:

**KU SUG BASKAAGA HAKADKA BASKA** – Ka eeg lambarka jidkaaga calaamada hakadka baska. Saacadaha baska, maababka iyo warka kale waxa dhici karta in lagu dhajiyo hakadka baska. (U akhri si gudub ah oo bidix ka bilaabmaya midigna ku dhamaanaya).

**GARO BASKAAGA** – Marka basku soo dhawaado, hubso lambarka baska iyo meeshu u ku socdo (waxay ku yaalaan dusha daaqada hore) si ad u hubsatid inu baskaagii yahay.



**FUUL BASKA** – Bixi lacagta baska markad fuulaysid. Basaska kuwa sii tagaya Siyeetal dhexdeeda, marka hore fuul ka-dibna bixi lacagta markad ka dagaysid. Ku rid lacagta ama tigidhada basaska sanduqa lacagta. Darawaladu ma hayaan sarif, sidaa daraadeed ku rid lacagta saxda ah ee lagu raaco. Haddii kaadhkaaga basku ee ORCA Card , kaadhka tus darawalka.

Haddii baska ad badalanaysid oo ad raacaysid ku kale oo ku geeya meesha ad ku socotay, weydiiso darawalka inu ku siiyo warqada badalashada markad lacagta bixinaysid. Warqada badalashadu waxay socotaa oo lagu raaci karaa bas kasta saacad iyo badh ka dib marka lagu jaro.

#### **RAAC XEERARKAN GAADIIDKA:**

- Ha hayirin banaanka kuraasta dhexdooda.
- Lama ogala sigaarka iyo cabitaanka khamriga ah.
- U daa kuraasta hore waayeelka iyo naafada.
- Cuntada ama cabitaanka ku sido weel xidhan kaliya.
- Isctimaal kaliya raadhyowga/cajaladaha haddii ad haysatid samaacadaha dhagaha la gashado.
- Madaxaaga iyo gacmahaaga ha u saarin dibada baska.
- Bixi lacagta saxda ah iskana ilaali inad dhibtid darawalka iyo dadka kale.
- Ha la fuulin wax hub ah gaadiidka magaalada.

**KA-DAGISTA BASKA** – Marka basku u soo dhawaado hakadkaaga, jiid xadhiga ka sareeya daaqadaha si ad darawalka ugu sheegtid inu joogsado.

#### **WARKA QIIMAHA**

Wakhtiga lagu jiro iyo tirada xaafadaha ad dhexmartid ayay ku xidhan tahay qiimaha raacista baska. Marka lagu jiro saacada dadku isku badan yahay – oo ah Isniin ilaa Jimce, 6–9 subaxnimo iyo 3–6 galabnimo – dadka waaweyni waxay bixiyan qiime wax yar ka sareeya qiimaha saacadaha isticmaalayaashu yar yihiin. Qiimuhu dadka intiisa kale waa u mid kaliya maalintii oo dhan. Siyeetal faras-magaaladaheedu ama badhtankeedu waxay leedahay aag raacistu bilaash tahay laga bilaabo 6 subaxnimo–7 galabnimo maalin walba.

#### **WARKA ADEEGA GAADIIDKA**

**ADEEGA BASASKA LEH WIISHKA** Dhamaan basaska magaaladu waxay leeyihiin wiish lagu isticmaalo hakadyada intooda badan oo loogu talagalay kursiga naafada iyo qalabka socodka ee nafaada.

**KAADHADHKA IYO TIGIDHADA** waxa lagu iibiyaa dhamaan Siyeetal iyo Kiin Kawnti (King County). Wac 206-624-PASS si ad qiimaha iyo goobaha iibka u ogaatid.

**JADWALKA WAKHTIYADU** wuxu sheegaa jidadka baska, wakhtiyada, qiimaha raacista, maababka iyo war kale oo muhiim ah. Jadwalka wakhtiyada waxa laga helaa basaska iyo laybareeriyada, dukaanada qaarkood, xarumo loogu talagalay iyo xafiisyada Adeega Macaamiisha ee Gaadiidka ‘Metro.’ Wac 206-553-3060 si ad u ogaatid meesha kuu dhow.

**BUS-TIME’ (SAACAD BAS)** waa adeeg iswada ama otomaatig ah oo 24 saacadood ah kaasoo marka tilifoon lagu soo waco bixiya warka wakhtiyada gaadiidka dadweynaha. Garaac kalmada B-U-S-T-I-M-E (206-287-8463) si ad faahfaahinta u heshid.

**GALISTA INTERNETKA** - ‘Metro Online’ waa rukta internetka ee laga helo warka gaadiidka ‘Metro’, ay ku jirto jidadka, jadwalka wakhtiyada, maababka iyo adeegyada iyo barnaamijyada kale ee gaadiidka ‘Metro.’ Adreesku waa: <http://www.metro.kingcounty.gov>

**WAX LUMAY IYO WAX LA HELAY** waa qaybta ad soo wici kartid markad u malaysid inad alaab baska kaga tagtay– lambarku wa 206-553-3000.

#### **WA SHAQADA**

Daydayasho shaqo waxay noqon kartaa arrin adag. Adeegyan soo socda ayaa kuu gargaari kara. Nasiib wanaagsan!

#### **XARUNTA WARKA SHAQADA EE EERIBORT ‘AIRPORT JOBS EMPLOYMENT INFORMATION CENTER’**

Adigoo isticmaalaya Xarunta ‘Airport Jobs Center,’ waxad heli kartaa adeeg war ah oo meel la isugu keenay kuna saabsan shaqooyinka laga helo Eeriboodhka Sii-taag Sea-Tac Airport Waxa kale oo Xarunta laga helaa aqoonyahano shaqo kuwaasoo kaa gargaari doona shaqo helista kharash la’aan.

#### **Shaqooyin Banaan**

Fursadaha shaqo waxay u kala baxsan yihiin qaar meel hoose ama galis ah iyo kuwo ah jagooyin xirfadle. Shaqo-bixiyayaasha ka qaybgala barnaamijku waxay ka kala socdaan adeegyo badan oo kaladuwan ay ku jiraan shirkadaha diyaaradaha iyo adeegyada diyaaradaha, hoteelada, gaadiidka, waardiyaha, qaadista baqshadaha, nadiifin, iyo cunto samayn.

Xarunta ‘Airport Jobs’ waxay uririsaa shaqooyinka banaan waxana ay ku qortaa liisaska todobaadka socda. Waxa kale oo Xaruntu bixisaa sharaxaad tifaftiran oo shaqada ah iyo war ku saabsan shaqobixiyayaasha gaarka ah iyo habka shaqada looga codsado.

## **Aqoonyahano Shaqo**

Aqoonyahanada shaqada ee Xarunta 'Airport Jobs' waxay ku gargaari karaan iyagoo:

- Kuu helaya fursado shaqo marka la eego taariikhaada shaqo, xirfadaada, waxbarashadaada, iyo wixii ad xiisaysid,
- Ku siinaya isticmaal bilaa lacag ah ood isticmaashid kombiyuutarada mishiinada koobiga, fakisyo, iyo adeegyo kale oo shaqo
- Kaa gargaaraya waraaqaha codsiga shaqada iyo wixii la xidhiidha,
- Kuu gudbinaya adeegyada beesha si lagaaga gargaaro gaadiidka, tabobarka, sii-haynta ilmaha, iyo
- Waxyaabo kale oo badan.

## **Kala Xidhiidh Xarunta 'Airport Jobs'**

Tilifoon..... 206-787-7501  
Rugta Internetka..... <http://www.airportjobs.org>  
Xafiis .....Sea-Tac International Airport, Main Terminal, Room 6447  
Saacadaha.....Isniin, Dadweynaha waa ka xiran tahay.....Salaaso ilaa Jimcaha 9am – 5 pm.

## **ILAHA SHAQADA 'WORKSOURCE' EE RENTON**

Xarunta Ilaha Shaqada 'WorkSource' ee Renton waa barnaamij gargaar shaqo-helid bilaash ah si ad u heshid shaqo. Barnaamijku waxa uu tarjumad gargaar ah kaa siin karaa dhamaan waxyaabahan soo socda:

- Shaqo gudbin iyo geyn
- Waxbarasho sida shaqo loo helo iyo sida loo haysto
- Gudbinta tabobarada iyo adeegyada kale ee beesha
- Galida internetka si ad shaqo u heshid.
- Istimaal bilaash ah oo ad isticmaashid kombiyuutaro, mishiinada koobiyada, tilifoonada, fakisyo iyo adeegyo kale
- Helista Caymiska Shaqo-la'aanta.

Ilaha Shaqada 'WorkSource-Renton' waxay ka tirsan tahay Ilaha Shaqada 'WorkSource-Washington', oo ah isbahaysi ururo u guntaday inay wax ka qabtaan baahida shaqo ee dadweynaha gobolka Wooshinton.

## **Kala xidhiidh Ilaha Shaqada 'WorkSource-Renton'**

Tilifoon.....206-205-3500  
Rugta Internetka..... <http://www.worksourceskc.org/locations>  
Xafiis.....500 S.W. 7<sup>th</sup> St. # 100 Renton, 98057  
Saacadaha.....Isniin ilaa Jimce, 8:00 subaxnimo - 5:00 galabnimo (ka eeg rugta internetka saacadaha la siyaadiyay)